St. Cloud HRA
Foojarka Doorashada Housing (Section 8)
Barnaamijka Furitaanka Liiska Sugitaanka

St. Cloud HRA waxay bilaabi doontaa qabashada arjiyada codsiga guryaha Housing Choice Voucher Program (Barnaamijka Foojarka Doorashada Guryaha) laga bilaabo Isniinta, Diseembar 4, 2023 saacadu marka ay tahay 8:00am CST oo dhamaanaysana Jimcaha, Diseembar 8, 2023 saacadu marka ay tahay 4:30pm CST.

Waxaan filaynaa in ay heli doono arjiyaal codsi ah oo ka badan tirada uu barnaamijkeena Housing Choice Voucher uu awoodo in uu guriga ku siiyo muddo macquul ah. Si aan u sameyno cadaalad isla markaana waafaqsan Sharciga Federaalka, waxaan qorsheyneynaa in aan sameyno howsha aqbalidda arjiyada aad qaadaneyno inaga oo adeegsanayna bakhtiyaanasiib. Bakhtiyaanasiibka macnihiisu waxa weeye ka dib marka dhammaan codsiyada la helo, waxaanu isticmaali doonaa kombuyuutar si aanu si aan kala sooc lahayn u doorano 1500 oo ka mid ah codsiyada lagu ridayo liiska sugitaanka ee Doorashada Housing Voucher.

Sida loo Codsado

- Ma jiraan wax khidmad ah oo lagaa rabo buuxinta codsiga liis gelinta. Bogagagga internetka ee kasta ee kaa dalbanaya lacag inaan bixisid si codsigaan laguugu sameeyo maaha kuwo sharci ah wax xiriir ahna lama laha maamulka guryeynta.
- Codsiyada waxaa ONLAYN AHAAN KALIYA looga aqbali doonaa boga internetka HRA ee https://www.waitlistcheck.com/MN1203.
- Codsadayaasha waxaa looga baahan doonaa in ay lahaadaan cinwaan iimayl ah si ay u codsigan u sameeyaan.
- Inta lagu jiro xilliga codsiyada la sameynayo waxaad codsan kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.
- Waxaan ka aqbali doonaa hal codsi halkii qoys ee kasta, sidaas darteed soo dirista arjiyo farabadan ma kordhin doonto fursadahaaga helitaanka kaalmada guriyeynta. Codisga ugu horeeya ee aad soo gudbiso oo kaliya ayaa la tixgelin doonaa.
- Codsiyada la soo buuxiyay inta u dhaxaysa Diisambar 4, 2023 saacadu markay tahay 8:00 a.m. iyo December 8, 2023 saacadu marka ay tahay 4:30 p.m. dhamaantood waxaa lagu dari doonaa bakhtiyaanasiibka.
- Maadaama aan codsiyada ka mid noqoshada liiska sugitaanka aan ku dooranayno qaab bakhtiyaanasiib ah, ma jirto wax faa'iido ah aad ka helayso in aad codsato maalinta ugu horeysa. Dhammaan codsiyada la helo inta uu furan yahay liiska sugitaanka waxay heli doonaan fursado isku mid ah oo loogu soo xulan karo bakhtiyaanasiibka.
- Codsadayaasha ku jira liisaska kale ee sugitaanka ee HRA waa inay codsadaan liiska sugitaanka ee Housing Choice Voucher si loogu daro bakhtiyaanasiibka.
- Hayso rasiidkaaga marka codsigaaga onlaynka ah aad gudbiso kadib. Haddii aadan helin rasiid, codsigaaga lama gudbin.
- Codsadayaashu waxay ka xaqiijin karaan in codsigooda lagu soo doortay bakhtiyaanasiibka boga internetka ee HRA ama inay galaan akoonkooda laga galo www.waitlistcheck.com Jimco, Janaayo 5, 2024 ama kadib. Haddii laguu doorto liiska sugitaanka xaaladda arjigaagu waxay noqon doontaa mid "Furan (Active)."
- Haddii codsigaaga aan lagu dooran bakhtiyaanasiibka, laguma dari doono liiska sugitaanka. Fursadaada kaliya ee aad ku heli karto Housing Choice Voucher ee hay'adeena waxay noqon doontaa in aad dib u codsato marka aan mustaqbalka mar kale dib ugu furno liiska sugitaanka.
- Codsadayaasha codsanaya hoy u baahan u qaabeyn macquul ah waa in ay codsigooda qoraal ahaan ugu soo gudbiyaan HRA ugu dambayn 4:00 galabnimo maalinta Arbacada, Noofambar 16, 2023 si loo tixgeliyo.

Qoraalo Muhiim ah

- 90% codsadayaasha la xushay waxay u baahan doonaan in ay buuxiyaan shuruudaha doorbidida HRA, ee ah meelaha ay ku nool yihiin, ka shaqeeyaan ama ay ka dhigtaan iskuul wakhti buuxa ee ku jira xuduuda

magaalada St. Cloud ama degmooyinka Benton, Sherburne ama Wright. 10% codsiyada la xushay waxay noqon doonaan kuwo aan doorbiddooda la eegeynin.

- Codsadayaasha lagu doortay bakhtiyaanasiibka LOOMA dammaanad qaadayo in ay helayaan foojar. In lagugu doorto bakhtiyaanasiibka micnaheedu waxay ka dhigan tahay oo keliya in codsiyada la doortay lagu dari doono liiska sugitaanka.
- Marka aad gasho liiska sugitaanka, waxaad heli kartaa in laguu soo bandhigo foojar, laakiin waa haddii aad u qalanto oo kaliya Barnaamijka Housing Choice Voucher ee hoos yimaada Sharciga Federaalka iyo haddii foojar laga helo St. Cloud HRA oo kaliya.

Macluumaadka Barnaamijka

Housing Choice Voucher Program waa barnaamij ay maalgaliso dawlada dhexe kaas oo ka caawiya qoysaska dakhligoodu yar yahay in ay ku bixiyaan kirada guryaha gaarka ah, qiimaha suuqa guryaha looga kireysto. Kiraystuhu wuxuu keensanayaa guri (shuruudaha qaarkood ay ku xiran yihiin); ka qaybqaataha ayaa bixiya 30-40% dakhliga guud ee qoyskooda lagu jaangooyay; HRA waxay si toos ah qayb ka mid ah kirada guriga u siisaa hantiilaha.

Tusaale kirada 30% ee dakhliga: Qoyska uu hal qof ka shaqeeyo waqti-buuxa ah oo joogta ah qaatana $15.00/saacaddii ayaa laga yaabaa in ay u bixiyaan $780 bishiiba kiro ahaan.

Kani waa kabitaan ku salaysan kiraystaha (kabitaanku wuxuu la socdaa kiraystaha).

Xadadka Dakhliga

Si aad ugu qalanto foojar, dakhligaaga guud ee sanadlaha waa in uu ahaadaa ama ka hooseeya xadka dakhliga ee hoos ku qoran.

Degmooyinka Stearns & Benton

Tirada Qoyska	Xadka
1	$32,750
2	$37,400
3	$42,100
4	$46,750
5	$50,500
6	$54,250
7	$58,000
8	$61,750
9	$65,450

Degmooyinka Sherburne & Wright

Tirada Qoyska	Xadka
1	$43,500
2	$49,700
3	$55,900
4	$62,100
5	$67,100
6	$72,050
7	$77,050
8	$82,000
9	$86,950